

**Oggolaanshaha la Wargaliyay ee Adeegyada Telemedicine**

Aniga (ama canuggayga) waxaa la i siiyay ikhtiyaar aan ku helo adeegyada caafimaadka dhirirka telemedicine. Adeegyadan waxaa ka mid noqon kara daaweynta shaqsiga ah, daaweynta qoyska, daaweynta kooxeed, xirfadaha shaqsiyeed, xirfadaha kooxda, qiimeynta baadhitaanka, maaraynta kiisaska ama qorsheynta daaweynta, ama adeegyo kale. Waan fahamsanahay in gaarsiinta telemedicine ee kuwan adeegyadu ay ku dhici doonto hababka aan hoos ku xushay, bixinta hab nooca ah waxa lagu oggolaadaa adeegga khuseeya iyo shuruudaha biilka:

- Laba hab, isdhexgalka wada-hadalka fiidiyowga
- Laba hab, isdhexgalka wada-hadlka maqalka ah (telefoon)

Waxaan fahamsanahay in kaqeyb qaadashadeyda (ama cunugeyga) ee adeegyada caafimaadka dabecadda ee lagu bixiyo telemedicine ay tahay ikhtiyaar oo aan diidi karo kaqeybqaadashada ama aan go'aansan karo inaan joojiyo kaqeybqaadashada markasta, hadal ahaan ama qoraal ahaan. Tan waxaa lagu qori doonaa diiwaankayga caafimaadka.

Iyadoo la waafajinayo mas'uuliyadaha lagu sharxay Ogeysiiska Ku Dhaqanka Asturnaanta ee People Incorporated, waxaan fahamsanahay in People Incorporated ay ilaalin doonto asturnaanta iyo amniga macluumaadka shakhsiga ah (ama canugeyga) iyadoo la adeegsanaayo tiknoolajiyad u hoggaansan sharciga quseeya iyo heerarka guud ee la aqoonsan yahay. Hasayeeshee, waxaan sidoo kale fahamsanahay in ku helidda adeegyadu telemedicine aysan la mid ahayn helitaanka adeegyada fool-ka-foolka ah, iyo halista qaar ka mid ah asturnaanta iyo amniga macluumaadkayga shakhsiyeed ee (ama canuggayga) laga yaabo inay ka jiraan gaarsiinta telemedicine ee adeegyada caafimaadka dabecadda taas oo aan ka jirin bixinta adeeg fool-ka-foolka ah.

Waxaan ku raacsanahay in aniga (ama ilmahaygu) goobjoog u noqon doono ballamaha jadwalka ah oo aan dhammaystiri doono waraaqaha ama dukumiintiyada ay u baahan yihiin People Incorporated ee loogu talagalay bilowga iyo sii wadista adeegyada. Waxaan oggolahay inaan ku wargaliyo dabecadda adeeg bixiyaha caafimaad oo bixinaya adeegyo beddelahay shucuurtayda iyo (ama ilmahayga) dabecaddayda, iyo wixii walaac ah ee ka dhasha muddada daaweynta.

Haddii aan bixinayo oggolaanshaha gaarsiinta adeegyada hab-dhaqanka caafimaadka ee ilmahayga iyada oo loo marayo telemedicine, waxaan ku sii raacsanahay in:

Haddii ilmahayga la magacaabay ka yar yahay 12 sano, qof qaangaara, oo isla markiiba heli kara telefoonka, ayaa joogi doona guriga inta lagu jiro ballanta telemedicine iyo bixiyaha caafimaadka habdhaqanka waxaa la siin doonaa lambarka xiriirka qaangaarka iyo lambarka xiriirka ee ilaaliyaha ilmaha (haddii uu ka duwan yahay) kal-fadhiga kahor; iyo

Haddii ilmahaygu u dhexeeyo da'da 12 iyo 18 sano jir, ilaaliyaha cunugeyga waa in lagu helaa taleefoon inta lagu jiro jadwalka kalfadhiga telemedicine iyo bixiyaha caafimaadka dabecadda waxaa la siin doonaa lambarka xiriirka qaangaarka kahor kulanka.

Waan aqriyay dukumiintigaan waxaan ogolahay inaan helo adeegyo caafimaad habdhaqan iyadoo la adeegsanayo telemedicine oona la raacayo shuruudaha kor lagu sharaxay.

\_\_\_\_\_  
**Qor Magaca Loo-adeegaha**

\_\_\_\_\_  
**TAARIIKHDA DHALASHADA**

\_\_\_\_\_  
**Saxeexa Loo-adeegaha**

\_\_\_\_\_  
**Taariikhda**

Haddii waalidka/wakiilka u saxiixayo isagoo matalaya loo-adeegaha, fadlan dhammaystir macluumaadka soo socda:

\_\_\_\_\_  
**Qor Magaca Waalidka (haynta leh iyo aan haynta lahayn) ama Ilaaliye**

\_\_\_\_\_  
**Saxeexa Waalid (haynta leh ama aan haynta lahayn) ama Ilaaliye**

\_\_\_\_\_  
**Taariikh**